



## Kaarka Soshal Sakuritiga

Waxaayalaha ugu horeeya oo ay kugu caawinayso hayada IRC waxaa ka mid ah sida loo codsado caarka soshal sekuritiga. Karka soshal sekuuritiga waxa loo isticmaali karaa shaqada, baananka, skuulada, warqada wadidsta baabuurka iyo wax yaalo kale oo aad u muhim ah.

Telefoonka xafiiska Soshal Sekuuritiga waxa weeye **1800-772-1213**. Xafiisyada Soshalka Sakuuritiga cinwaankoodu waa ku wan halkan hoose ku qoran:

- 880 Front Street, San Diego
- 769 Dagget Street, San Diego
- 1940 Garnet Street, San Diego
- 415 N. Euclid Avenue, San Diego
- 380 3<sup>rd</sup> Avenue, Suite B, Chula Vista
- 1068 Broadway, 2<sup>nd</sup> floor, El Cajon
- 7373 University Avenue, La Mesa
- 205 W. Mission Avenue, Suite G, Escondido
- 1305 Union Plaza Ct., Oceanside

## Lacagta Soshal Sukuritiga

Barnaamijka macaawinida oo loo yaqaan (Welfare) waxa ay u hayaan dadka indhaha la, dadka curyaamiinta ah ama maskaxda la ga hayo iyo dadka da'doodu ka weyn tahay shan iyo lixdan jir oo baahidooda madiga ahi ay aad u wenn tahay lacag loogu tala galay in ay dadkaasi. Dadka qaxootiga ahi barnaamijkan way u fasaxan yihiin in ay barnaamijkan ka qayb galaan, hadii ay xaq u yeeshaan. Barnaamijkan kor aan ku soo sheegnay wuu ka duwan yahay barnaamijka lacagta ta'da ee la siiyeo daka marka ay shaqada joojiyaan. Barnaamijkaa oo ay iyana xafiiska soshal sekuurigu qaabilsanyihiin.

Arjika barnaamijkan waa arji aad u dheer wakhti dheerna qaata, markaa waxa haboion in aad bilowdid codsiga arjigan sida ugu horeysa.

Codsiga arjigan waxa loo baahan yahay in aad keentid warqad cadynaysa da'da qofka iyo in uu qofku uu qabo baahi dhaqaale. Dadka qaata lacagta SSI da looma ogola in ay qaataan lacagta welfeerka iyo tigidhada cunitada oo loo yaqaan (food stamps), laakiin waxay xaq u leeyihiin in ay codsadaan carka caafimaadka.

Dadka soo galay dalka taarikhdu markay ahayd 8/22/96 ama kuwa da'doodu tahay shan iyo lixdan jir taarikhdaa kor ku dhigan ka bacdi waxay xaq u yeelan doonaan lacagta loo yaqaan SSI oo loogu tala galay dadka waayeyn. Waxay lacagtaas dadka waayen dadku qaadan karaan 7da sano oo ugu horeysa marka ay dalka soo galaan. Wakhtigaas ka bacdi waa in qofku noqdaa qof Maraykan ah si lacagtaasi loogu sii wado. Waxaa muhim ah in uu qofka qaadanaya lacagta SSI du uu joogo dalka gudihisa, oo aanu ka maqnaan Karin dalka mudo ka badn 30 casho, waayo qof aan dalka deganyn oo 30 cisho wax ka badan dalka ka maqani lacagta SSI da xaq u ma laha.

Hadii aad u baahantahy macluumaad ku saabsan arinta arjiga kor ku qoran, waxaad la soo xidhiidhaa qofka qaabilsan armiha Soshal Sekuuritiga ee IRC ama kala xidhiidh xafiiska Soshal Sekuritiga telefoonka 1-800-772-1213.